Xafiiska Qarammadda Middobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya

Warqad ku socota Jaaliyadda Somaliyeed ee Qurbaha Ku nool

Addis Ababa, 4 Febrayo 2009

Salama Calaykum

Saaxibayaal,

Tani waa warqaddi labaad ee aan idin soo dirayo usbuuc gudihiis bacadama is-bedelo xawli badan ay dalka ka socdaan, waxaana dareen-sanahay in ay aad muhim u tahay in aan idinla socodsiiyo marxaladaha is-bedbedelaya.

Maanta Soomaaliya waxay leedahay Barlamaan la balaariyey iyo Madaxwene cusub, kaas oo si xaq ah oo furan loo dortay. Waxaan hubaa in dad badan oo idiinka mid ah ay si hoose warbaahinta ugala socdeen dhacdooyinkii usbuucii hore. Waxaa aad dhirrigelin u laheyd in aan aragno isla markii Sheikh Sharif Sheikh Ahmed loo doortay madaxweynaha cusub, in dhammaan musharaxiintii kale ay balan qadeen in ay tagerayaan, lana shaqeynayaan Madaxweynaha cusub, dhiniciisana Madaxweynahu wuxuu ballan qaaday in uu si hoose ula xiriiri doono raggii asaga la tartamaayey inta suurta gal ah. Dhammaan musharaxiinta waxay tageersan yahiin dib-uheshiisiinta iyo baahida loo-qabo soo celinta sharafta iyo karamada ummadda Soomaaliyeed.

"Mid-kiina ma lahaanayo cidaado saxiix ah haddii usan la jeclaan walaalkiisa muslimka ah waxa uu la jecelyahay naftiisa". "Xadiithkaan waxaa soo weriyey Anas Ibnu Malik, wxuuna ku jira Bukhaari iyo Muslimkuba".

Waxaan ku jirna waa cusub – mana jirayso fikradii aheyd in ninkii gulaysto uu wax walba qaato. Haddana xooganna waxaa la saarayaa in madaxda Soomaaliyeed ay iskaashi yeelato. Waana sidaas sida Rass'ul Wassare Nuur Cadde iyo ku-xigeenadiisa ay uga mid noqdeen wafdiga madaweynaha ee aaday Addis Abbaba, kana qeyb galayaan kulan-madaxeedka Ururka Middowga Afrika. Tani waxay tusaale u tahay baahida loo qabo in helo dawlad loo dhanyahay sida ugu dhaqsi badan, horeyna loogu dhigo-dib-uheshiisiinta iyo xasilinta dalka.

Dhab ahaantii bulshada caalamku waxay si buuxda u ogolaatay wixii ka dhacay Jabuuti, khaasantan shir-weynihii kulam madaxeedka Afrika ee ka dhacay Addis Ababa. Madaxweyne Sharif iyo wafdigiisa waxay u safreen Addis Ababa ayagoo raacay dayaaradii qaaska u aheyd Madaxweynaha Dalka Jabuuti, waxaana si aad u sareysa loogu soo dhaweyey Addis Ababa sida loo dhaweyey madaxda kaleba, waxaana halkaan ka muuqaatay in soo dhaweeyn diiran loo yahayo madaxweynaha ugu cusub ee Afrika. Jabuuti iyo Addis Ababa, Madaxweyne Sharif wuxuu la kulmay wakiilo ka soocda Middowga Afrika, Middowga Yurub, Jamacadda Carabta, Australia, Fransiiska, Talyaaniga, Ingiriiska iyo Dowladda Mareykanka, iyo Waddama kale. Addis Ababana, Madaxweynahu wuxuu kula-kulmay madaxweynayaal Afrikaan ah iyo wafuud kale oo carabeed ee halka booqasho ku

joogtay aadna waa logu sacbiyey. Madaxweynahu wuxuu ka qeyb-galay shir ay yeesheen Madaxda Urur-Gobaleedka IGAD, kaas oo balam qaaday kalmadiisa joogta ah. IGAD waxay la mid tahay urur gobaleedyada kale ee waa-weyn sida Urur Gobaleedka ka jira Koonfurta Afrika ee SADEC iyo kan ka jira galbeedka Afrika, ECOWAS.

Soomaali badan iyo saaxibadood ayaa rajeynaya in xiriirkii ku dhisna is-kharbudaada ee Soomaaliya iyo wadamada deris-keeda ah uu hadda hagaagi doono, ayna bedeli-doonto saaxibnimo dhexmarta dawladaha, kuna dhisan is-xurmeen iyo ilaalinta maslaxada wadanwalba leeyahay. Taariikhda haddii dib loo eego, waxaa arkeynaa wadamo fara-badan oo xaliyey khilaafyadoodii taariikhiga aha. Tusaale aahaan Fransiiska iyo Jarmalka ayaa hadda ah saaxibada ugu weyn ee heer Yurub. Sida oo kale, Mareykanka iyo Shiinaha oo xaliyey khilaafkii xuma ee ka dhexjiray waqtiyadii dagaalka qabooba, haddana ah wadamo xiriir weyn ee ganacsi ka dhexeeyo. Wadamdu ma dooran karaan derisyadooda, awoodna uma leh in ay bedelaan. Soomaaliya, Jabuuti, Ethiopia iyo Kenya, ma jirto wadakale oo u furan oo aan aheyn in ay wada noolaadaan wadana shaqeeyaan. Samanka, garashada fayow iyo maslaxada wadajirka ah ee dhaqaale iyo ban'aadanimo oo isbiirsaday ayaa ku hagaya dadka Soomaaliyeed dhinaca noolasha wanaagsan ay jirto.

Talaabada kale ee hadda ka dhiman geedi-socodka waxay tahay xulitaanka Raii'sul Wasaare iyo dawlad midnimo qaran leh ee cusub. Rajado waxay tahay in baarlamaanka Soomaaliyeed, xukuumada cusub iyo dhammaan taageera-yaashu ay ku noqon doonaan Soomaaliya usbuuca soo socda. Xubnaha baarlamaanka ee hadda Jabuuti jooga waxay ka qeyb galayaan tababaro ay si hoose arrimmaha muhim ah ugu wadahadlayaan. Ruuxkasta haddii uu yahay ganacsade, indheer-garad, NGO iyo ciddii kale ee uu ahaa-daba waxaa la doonaya in uu taageero xukuumada si loo soo celiyo sharaftii Ummadda Soomaliyeed. Arrimahaan waa in ay wadada u xaaraan sidii lagu heli lahaa Soomaaliya oo wadan caadi ah, degan, nabaddana laga jecel yahay. Bulshada caalamku waxay diyaar u tahay in dadka Soomaaliyeed dib ugu soo dhoweeyso bahweeynta dawladnimo ee aduunka.

Waxaan ugu baaqaya kuwa aan weli geedi-socodka nabadda ku soo biirin in ay ku soo biiraan fursadaan taarikhiga ah. Dowr ayana u banana. |Saaxibadeyda iyo anigu UN-ta ka mid ah, waxaan diyaar u nahay in aan arrintaani wixii fududeyn ah oo suurtagale ah ka geeysano.

Taageerayaasha nabadda waxay heystaan sababa badan oo ku kalifaaya in ay sii wadaan shaqadooda wanaagsan. Kuwa qaska sii-wada waxay oon dilayaan dadkooda iyo Soomaali kale. Ma jirto sababkale ee dagaal loo sii wado oo aan ka aheyn in si sharci daro ah looga qaado dadka canshuur, baad, madax- furasho ama isbaarooyin ku-dhisan awood ayada oo la ogyahay in nabadu u keeni karto shakhsiyaadka iyo wadankaba dhaqaale farabadan oo sharci ah.

Waxaa jira muran ku saabsan shilkii dhacay Isniintii la soo dhaafay Muqdishu, kaas oo hadda baaritaankii su uu socdo, oo si nasiib-daro ahna ay ugu dhinteen dad Soomaaliyeed. Naf-gowyntu waa arrin aad looga xummaado, Aniguna waxaa tacsi u dirayaa qoysaskii iyo qaraabiddii ay ka baxeen dadkaasi. Dad badan oo goob-joogayaal ah ayaa ku qanacsan in shilka looga danlahaay in ay leexiso dareenka

kulan madaxeydka Midowga Afrika, hase ahaatee arrintu sida ma noqon. Madax badan oo Carab iyo Afrikaan-ba leh ayaa si isa soo tareeysa shaki u gelinaaya xaqiiqnimada ku saabsan sida ay war-baahinta qaarkeed wax uga sheegayaan dhacdadaan.

Waxaan ugu baaqaya dhammaan dadkiinaan qorba-joogta ah in aad la hadashaan saaxibadiina iyo dadk taabacsan-ba sii loo sii daayo dhammaan dadka madax-furashada loo heysto Soomaali ama ajnabi ha ahaadeene, haddii yihiin Australiyaan, Belgium, Britain, Bulgariya, Canada, France, Itali, Kenya iyo wadama kaleba. Dadkaan sabab la'aan aya madax-furasho loogu qabsaday aygaa oo fulinaaya shaqo la xiriirta arrimaha ban'aadinimo.

Waxaa jira fursad cusub ee dib loogu soo celinaayo magaca Soomaaliyeed, dhammaan soomaalida waxaa looga baahan yahay in ka faa'iideystaan frusadaan, ayna ka dhigaan mid shaqeeysa. Mustaqbalka Soomaaliya wuxuu jira gacmaha dadka Soomaaliyeed. Waa in ay ku bedelaan dagaalka wada-hadal, iskala saarista isu-keenis, isdilkana noolal, is-duleyntana sharaf iyo karaamo.

Walaalkiin Ahmedou Ould Abdullah.